

Barnmorskemottagningar, Regionhälsan

Patientinformation: ASA (acetylsalicylsyra) – förebyggande behandling under graviditet översatt till somaliska.

Datum: 2025-02-10

ASA (acetylsalicylsyra) – daaweyn kahor tag xilliga uurka

Preeklampsi (ku sumoowidda uurka) ayaa micnaheedu yahay dhiig kar iyo jiritaan borotiin kaadida. Preeklampsi ayaa ku dhaca 2–8% dhamaan dumarka uurka leh wuxuuna keeni karaa dhibaato weyn xilliga uurka.

Xanibaad koritaanka uur ku jirka (intrauterin tillväxthämning, IUGR) ayaa badanaa ka timaada preeklampsi inkastoo ay haddana iskeed u iman karto.

Preeklampsi iyo xanibaad koritaanka uur ku jirka waxa sababa shaqeyn hoos u dhacda ee mandheerta.

Daraasaad dhowra ayaa lagu ogaaday in cadad yar ee aashitada acetylsalicylsyra (ASA) oo la siiyo dumarka qatarta ku jira ay hagaajin karto adeegga mandheerta isla markaana hoos u dhigeysa preeklampsi iyo xanibaadda koritaanka uur ku jirka. Daaweynta ASA ayaan dumarka uurka leh ama caruurta uurka ku jirta u keeneyn qatar weyn.

Haddii adiga lagu qiimeyo inaad qatar ugu jirto inaad hesho preeklampsi/xanibaad koritaanka uur ku jirka waxa sidaa aawadeed lagu talinayaa in aad qaadato qaiyaas yar oo ASA (75 mg) ah habeenkii.

Fiiro gaara: Waxa la arkay in faa'idada ka hor tagga xilliga ugu wanaagsan in la qaato daawadu tahay habeenki. Waxaa daawada laga soo gataa/iibsadaa farmashiyaha/farmasiiga adiga oo isticmaalaya rijeetada uu kuu soo qoro dhakhtarka ka shaqeeya qaybta ummulaha.

Waxaa la bilabayaa daaweynta todobaadka 10–12-aad ee uurka isla markaana waxaa ay socon doontaa daaweyntu ilaa todobaadka 36+0-aad ee uurka.

Adiga qaba aad ugu nuglaasho ASA ama daawooyinka kale ee xanibaya infalamayshanka (NSAID) ma qaadaneysid daawadan ka hor tagga ah. Haddii aad qabto nabar caloosha ah, cudurada dhiigga ama kugu yar yihiin unugyada xinjirta dhiiga (trombocytopeni) waa inaadan qaadan daaweynta Trombyl.

Haddii uurkaadi hore aad la kulan tahay dhibaato ka timid preeklampsi iyo/ama xanibaad koritaanka uur ku jirka markaa dhaqtarka mas'uulka ee qaabilaadda umulisada caruurta ayaa xukminayo arintaada iyo lagu qabanayo wax kale oo saa'id ah xilliga aad uurka leedahay.